Erayga iyo Maanta Somtwt 0242
Cashada Sayidka

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Nimcada Ilaah.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Nimcada Ilaah** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

SOGN: QALBIGAYGAA KU DOORTAY

Hal arrin oo la wada ogsoon yahay inay dhab tahay ayaa waxay tahay in dadka oo dhan, oo adiguba aad ku jirto, aanay dembi ka marnayn. Waxaana aan dhammaanteen u baahan nahay nimcada iyo saamaxaadda Ilaah. Waxaan mar hore maqlay in nimcada lagu sifayn karo hodantinimada Ilaah oo salkeedu yahay wixii Masiixu keenay. Bil xaqiiqa, waa dhab in Ilaah inagu siiyey hodantinimada ammaantiisa iyo saamaxaadiisa kaddib markii Ciise qaantii laynoo haystay ku bixiyey Iskutallaabta.

Waxaa jira labo khalad oo laga aaminsan yahay Nimcada Ilaah sidaan is leeyahay. Labada khalad ee laga aaminay nimcada waa dareen maskaxeed. Waa go'aammo dadku ay gaaraan marka ay joogto sida ay doonayaan inay u dhigaan saamaxaadda Ilaah. (1) Kan kowaad, waxay aaminsan yihiin, sida in nimcada Ilaah ayan dabooli Karin dunuubtii ay faleen, oo aad u badan.

Waa dareen soo jireen ah oo la leeyahay waxaan ahay mid belaayeysan; oo dembiile ah. Waxaa jira dad ciyaar u qaata markaan ku iraahdo imaada goobaha cibaadada, oo inkastoo ay og yihiin inaan wadaad ahay, si kulul uma qaataan waanadayda. Waxaanan ku dhiirrogeliyaa inay cusboonaysiiyaan noloshooda ama inay toobadkeenaan oo u yimaadaan Masiixa oo ku soo biiraan muuminiinta joogta Kiniisadda.

Habase yeeshee waxay igu yiraahdaan, iyagoo kaftamaya, **"Haddii aan imaado safiitada ama saqafka kore ayaa igu soo dhacaya."** Markaasaan ugu jawaabaa ama ku iraahdaa, **"Taasi suuragal maaha, aasaaskuna waa adag yahay, saqafna kugu soo dhici maayee, ciyaarta jooji."** Kaftankooda ayaa ka dhigan ama ka macne ah in iyagu ay dareemayaan eed.

Waxay la tahay inay yihiin dad aan qiimi lahayn oo aan u qalmin inay Ilaah soo hor istaagaan. Runta waxaa weeye inaanu jirin qof u qalma inuu Ilaah soo hor istaago. Innaga oo dhan waynu dembaabnay oo gaari weynay ammaanta Ilaah, sida qorniinku leeyahay. Markaasina waxaa hadalladoodu u dhacayaan sida inay leeyihiin, **Ma nihin kuwo la badbaadin karo, ama istaahila in la badbaadiyo.**

Waxaa jira shakhsiyaad eed ku raran, oo dabcan, sameeyey waxyaabo araggax iyo fashaxaarba leh. Laga yaabo in shakhsiyaadkaasu ay ku jiraan sharnimo iyo sino daran, ama ay kufsi sameeyeen, ama ay dad dileen oo uusan dhaqankoodu fiicnayn. Waa ayaandarro in dadku ay dembiyada caynkaas ah ku jiraan maantadanba. Haddiise adigu aad waxyaalahan oo kale samaysay, waxaad dareemaysaa sida inaad ceebaysan tahay.

Waxaad dareemaysaa sida inaanu Ilaah dan kaa lahayn, waxaanan tan ugu yeeraa 'Dareenkii Yuudas'. Yuudas wuxuu sameeyey dembi ula muuqday isaga mid aan la cafiyi Karin. Wuxuu ahaa mid fog waayo wuxuu gacangeliyey Sayidkiisii. Wuxuu Ciise u gacangeliyey dad doonayey inay isaga dilaan iyadoo welibana aanay jirin asbaab ay ku dilaan. Xaqiidii, intaanu Yuudas is-dilin ka hor, wuxuu yiri: **"Waxaan Sirqoolay qof aan eed lahayn oo dhiiggiisii la daadiyey."**

Waxaad og tahay in mararka qaar qofku qaadan karo fikirro xag jir ah sida dareenkii Yuudas ahaa, kaasoo dareemayey inuu gacangeliyey Ciise, oo wuxuu dareemay sida in Ciise uusan cafiyeynin isaga mar dambe. Haddaba runtu waxay tahay in Ciise samirkiisa rabbaaniga ah awgii, iyo awooddiisa rabbaaniga ah ee saamaxiidda darteed, uu doonayo inuu ina saamoxo. Taasina waa la yaabka ay leedahay waxa aynu u naqaanno **Nimcada Yaabka leh.**

Taasina waa cajaa'ibyada ku laran Injiilka, waxaana weeye in Ilaah samayn karo wax inanga awoodeenna ka baxsan oo ah inuu cafiyo dad aan u qalmin cafis. Haddana, waxaa jira shakhsiyaad inta isku noqda, yiraahda horta yaan ku dembaabay? Saw arki maysid, qofkii si kale ayuu u fakarayaa oo wuxuu leeyahay, maba jirto cid aan ku dembaabay, ee maxaan cafis ugu baahanahay. Taasina waa dabiicad kibir ku laran yahay, waana khaladka labaad ee qofku dareemo marak laga fakarayo Nimcada Ilaah. Fikirka qofka sidan baa loo dhigi karaa—wuxuu is leeyahay aniga waxaa laygu daafacay nimcada Ilaah. Waa fikir ama dabiicad ay isaga dhaadhicinayaan inay yihiin muuminiin oo aanay waxba ka khaldanayn.

Waxaa markaasi aalaaba soo baxaya ama muuqanaya kibir, ama qab maskixiyan ah markaasoo qofku dareemayo, maaddaama uu ka mid yahay muuminiinta Ilaah ay basiid tahay haddii uu yara baadiyoobo ama dembi aan weynayn galo. Wuxuuna is leeyahay, Si kastaba Ilaah wuu I jecel yahay, wuu I badbaadiyey, markaasina dembiyada aan badnayn wax dhibaal ma leh, khatarna u keeni mayso badbaadadayda.

Hadday sidaas kula tahay, khatar weyn baad ku jirtaa! Bal aan kula wadaago qidcada inoogu qoran Warqaddii kowaad ee rasuul Bawlos u qoray dadka reer Korintos 5, halkaasoo rasuul Bawlos u digayo dadka reer Korintos iyo masiixiyiintii joogay magaaladaas. Fikir ahaan waxay rumaysnaayeen marba hadday masiixiyiin yihiin in dunuubta yar yar aanay xanibaynin nabaadiinadooda. Waxaan la soo kala baxaynaa Warqaddan kowaad ee reer Korintos 5:9-11, waxaana qoran sidatan:

"Waxaan warqaddaydii idiinku soo qoray inaydnaan kuwa sinaysta raacin. Ulama jeedo kuwa sinaysta ee dunidan, iyo kuwa damaca badan iyo kuwa wax dulma, iyo kuwa sanamka caabuda, waayo, hadday sidaas tahay waxay noqon lahayd inaad dunida ka baxdaan. Laakiin hadda waxaan idiin soo qoray, Ha raacina qof walaal la yidhaahdo hadduu sinaysto, ama wax badan damco, ama sanam caabudo, ama wax caayo, ama sakhraamo, ama wax dulmo. Waa inaydnaan kaasoo kale xataa wax la cunin."

Rasuul Bawlos wuxuu ka digayaa dadka ay la tahay in Nimcada Ilaah layska bixiyey, iyo sida inay khasab tahay inuu helo, ama uu ku helay qandaraas iyo in badbaadadiisu ay khasab tahay.

Waxay la tahay inay khasab tahay badbaadadu marba hadduu Masiixi yahay. Kasab maahan inaad hesho saaxiib badbaadadaada Ilaah. Ilaah kuma khasbana inuu ku badbaadiyo oo uu ku saamoxo haddii aad ku sii socoto dembigaaga. Waxaad u baahan tahay inaad ogsoonaato inaad qiimayso Nimcada Ilaah, oo lama mid ahan sida qalabka dabka lagu demiyo oo markii dab gurigaaga ka koco, aad la soo baxayso oo aad dabaka ku deminayso, oo haddii uusan dab jirinna aad iska iloobayso.

Haddaba, dabiicadahaas oo kale iska ilaali, waayo waxay ka macne tahay rumaysaddarro ee maahan rumaysad. In dembiga lagu sii jiro ayaa ka dhigan sida inaan Ilaah ka dalbanayno ciqaab iyo eed. Waxaa loo baahan yahay inaan ogaanno in nimcada Ilaah aan leenahay iyo inay qiimi leedahay si aan u isticmaalno, iyo inay ina qalbi qaboojiso markii aan eed galno, iyo markii aan fashaxaar ku jirno, waayo Masiixu wuxuu u yimid inuu badbaadiyo dembiileyaasha.

Waa arrin cajiib ah inaan leenahay faallo dhamaystiran oo ah in Ciise leeyahay xoog uu inagu soo furto, oo uu badbaadiyo qof sida rasuul Bawlos oo kale ah. Rasuul Bawlos markii loogu yeeri jiray Saa’uul, wuxuu ahaa mid aad iyo aad u silciya masiixiyiinta, wuxuuna aad u nebcaa Ciise Masiix. Wuxuuna dad badan u soo xiray magaca Masiixa awgii, kuwaasoo gaaray ilaa iyo heer dhimasho.

Dabeeto eeg sidii Masiixu ula kulmay sida ku qoran cutubka 9aad ee kitaabka Falimaha Rasuullada. Wuxuu bedelay noloshii Sawlos gebi ahaanba, ilaa uu gaaray heer, markii magaciisa la bedelay kaddib, oo uu noqday adeegaha Sayid Ciise, uu la ashqaraaray jacaylka Ciise uu ku badbaadinayo kuwa

Isaga neceb. Wuxuuna raalinimada uu helay ku macneeyey inay ku timid silicii iyo kafaaragudkii Masiixa ee iskutallaabta si dadka isaga oo kale ah loo saamoxo. U malayn maayo in Bawlos arrinkaas isaga loo sameeyey uu ilaabay, wuxuuna mar waliba la amakaagi jiray jacaylka iyo naxariista Ilaah ee lagu dhex muujiyey Ciise Masiix. Haatan ogow in cawaaqibka dembiga uusan haraynin. Maadaama laguugu saamaxay Masiixa dartii waxaa hubaal ah inaad leedahay ammaan weligeed ah haddii rumaysadkaaga iyo rajadaadaba aad saarato Ciise Masiix.

Tanina wax aad ku ceeboobayso oo khiyaano ah maahan, laakiin waa baaq hubaal ah oo laguugu yeerayo inaad mustaqbalkaaga oo dhan geliso gacmaha Ciise Masiix oo aad isaga jeclaato, ka cibaadaysato oo aad u noolaato ammaantiisa. Kaasina waa rumaysadka dhabta ah. Ha yeeshee rumaysadkaagani kaa xorayn maayo cawaaqibka dembiga aad gasho kaddib markii aad Masiixa rumaysatay.

Haddii aad nacas noqoto oo aad inta fatuurad soo qaadato ama mooto aad si waalli ah u waddo oo aad shil gasho oo aad dhaawac isku geysato, cafiska dembigaaga kaa bogsiin maayo cawaaqibka doqonnimadaada, waxaadse helaysaa saamaxaad iyo bilow cusub. Bal fiiri haddii dhagax yar biyo lagu tuuro sida biyuhu ay u faafayaan, isla sidaas oo kale ayuu dembigu u faafaa. Laakiin nimcada Ciise waa sida dhagax weyn oo markii kii yaraa la tuuray dabadeed isna biyaha lagu tuuray, oo hirarkii hore ee dhagaxii yaraa uu abuuray, waxaa dhaafaya hirarka waaweyn ee dhagaxa weynu abuurayo. Taasina waa sida lagu macnayn karo nimcada Ilaah.

Wuxuu doonayaa inuu kugu daboolo saamaxaaddiisa iyo jacaylkiisa, oo uu noloshaada siiyo waddo cusub si aadan mar dambe ugu silcin cawaaqibka abadanka ah ee dembiga. Taasi miyaanay cajiib ahayn, oo qurux badnayn? Waxaan rajaynayaa haddii hadalkeenna maanta kugu cusub yahay, in aad heshay akhbaar tii ugu weynayd ee abid ku soo gaarta. Taasina waa run waayo hadalkanu waa Injiilka Ciise Masiix ee lagu siiyey si lagaaga badbaadiyo dembiga oo laguu siiyo Nolosha Daa'imka ah.

SONG: QALBIGAYGAA KU DOORTAY

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah aad ka maqli doontaan toddobaadka dambe saacaddii aan maanta soo galnay, isla idaacaddan. Waxaad waraaqaha noogu soo qortaa sanduuqa nambarkiisu yahay 21514, oo koodkun a yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu sood iri kartaan 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.